Maxaa Nagu Sababay Baahida Habaynta Jidadka iyo Gaadiidka La Raaco?

Waddada isku xirta (corridor) Nicollet-Central waa mid ka mida jidadka ugu gaadidkIa badan ee Twin Cities, waxayna isku xirtaa magaalada hoose ee Minneapolis oo leh gaadiid iyo jidad dhexmara xaafadaha magaalada hoose iyo xaafadaha dhow. Corridor (waddada isku xirta) waa mid koraysa siiba agagaarka magaalada hoose. Waxaanu u baahannahay nidaam jidad iyo gaadiid ee xamili kara koritaankaan, taaso isu socodka fududaynaysa iyo inay dadka lugeeyaan, soona jiidanaysa shaqooyin iyo maalgalin badan.

Xagaayihi 2012, Mashruucu waxuu fadhiyo u qabtay shacabka iyo maalgaliyayaasha, ayadoo wadahadallo, bandhigyo iyo waraysiyo la qabtay Sateembar 2012, kulamo ay qabteen maalgaliyaasha iyo sahanno internetka (la wacay tiro ka badan 2,000 qof) si lagu dhiso ujeeddada mashruuca, baahida iyo himilada mustaqablka.

Oktoobar 2012, Guddiga Latashiga waxay oggolaadeen ujeeddada laga leeyahay habaynta Corridor:

Ujeeddada laga leeyahay Nicollet-Central Transit Alternatives Project ayaa ah in la habeeyo isku xirnaanshaha socodka gaadiidka, kor loo qaado soo jiidada adeegyada gaadidka, laga faaiidaysto lacata lagu maalgalinayo dhismayaasha u dhaxeeya Nicollet-Central Corridor.

Himilada Mashruuca ayaa ah:

- *In la isku xiro dadka iyo goobaha*
- *La kordiyo bilicda gaadiidka iyo jidadka*
- *Laga faaiidaysto iyo la taageero horumarinta dhaqaalaha*
- *Lala mideeyo nidaamka gaadiidka*
- *La taageero hirgalinta dhaqan saxada dadka iyo bay'adda surtogalinaya*
- *La dhiso mashruuc ku hirgali kara taageerada jaalliyadda*

Ujeeddada iyo himilada Mashruuca ayaa ah inay noqdaan hagaha horumarinta iyo qiimaynta doorashada racitaanka gaadiidka.

Macluumaadka Corridor

- Dherarka: 9.2 mayl.
- Basaska Jidadka Mara: 10 iyo 18
- Dadka ku Nool: 90,00 oo degganayaal ayaa u jira hal mayl iyo nus – degaanka ugu jiqsan ee Twin Cities. La filayo illaa 25,000 qof inay ku kordhaan 20ka sanoo so socda, badankood magaalada hoose.
- Shaqooyinka: 125,000 shaqo ee ka jira inta u dhaxeeya hal mayl iyo nus gaar ahaan magaalada hoose. La filayo inay ku kordhaan illaa iyo 50,000 ee shaqo.
- Melaaha la Tago: Shaqooyinka iyo guryaha, jidadka iyo deegaanka, waxaa ka dhisan illaa 6,000 ee qolalka hoteellada, Minneapolis Convention Center, Minneapolis Institute of Arts, Central Library, Orchestra Hall, Nicollet Mall, iyo xaafado maqayaado/dukaamo leh ee magaalada hoose ka baxsan.
- Nicollet Mall iyo Magaalada Hoose: Nicollet Mall waa halbowlaha dhaqaalaha ee magaalada hoose waana meesha ay koobaad ee maalgalinta ganacsiga iyo shirkadaha.
- Lugayska: Illaa iyo 18,00 oo qof ayaa ku lugeeya Nicollet Mall maalin kasta.
- Baahida Badan ee Gaadiidka Safarrada Gaaban: 20,000 ee rakaabka maalin kasta waxay raacaan basaska 10 iyo 18, nus safarrada waxay ka dhacaan qayb 5½ mayl ee u dhaxaysa jidadka Lowry Avenue iyo Lake Street.
- Dad Badan Ayaa Gaadiidka U Baahan: Boqolkiiba labatan iyo shan ee dadka deggan in u jirta hal mayl iyo nus malaha gaari, iyo in boqolkiiba labaan iyo affar ay yihiin dad sabool ah – kuwaan oo ah tirooyin aad uga saarreeya dhexdhexaadka magaalada iyo gobolka intiisa kale.
- Dhisimo Xamili Kara Gaadiidka, Socodka iyo Baaskiilka: Gaadiidka, socodka iyo baaskiilka waa wax lagu wada isticmaali karo Corridor, si kala duwan loogu isticmaalo.
- Waqtiga Raacitaana Baska oo Yaraanaya: Meelaha ay dadka badan dagganyihiin waddada dheer, baska albaabka hore laga raacayo, bixinta lacagta marka baska galayso, iyo joogsiyada badan ee baska istaago ayaa safarka ka dhigaya mid gaabiya. Affar meelood hal illaa saddex meelood hal ee waqtiga safarka ee basaska 10 iyo 18 waxuu waqtiga intiisa badan yahay raacitaanka iyo ka dagagidda basaska, ayadoon ay u sii dheertahay dib u dhaca gaadiidka iyo calaamada joogsiyada.

The Nicollet-Central Corridor



http://www.minneapolismn.gov/nicollet-central

Bilowga Egitaanka Doorashada Gaadiidka a Hore ee Gaadiidka lagu Baadigoogayo

Si lagu qeexo doorashada qiimayn tifatiran, eegitaanka heerka sare ee nuucyada kala duwan ee doorashada sida wax laysku toosinayo ayaa la sameeyay si meesha looga saaaro doorashooyinka aan qancinayn mashruuca ujeeddooyinkiisa iyo himiladiisa. Qaababka doorashada ee loogu isticmaalay nuucyada doorashada eegitaanka iyo isku toosinta ay ku jiraan:

- Samaynnada ka imaanaya in sharci loo leeyahay in dhul la maro
- Waxa jaaliyadda fursad u yeelanayso inay hesho
- Iqaadi karaan qorshayaasha deegaanka iyo gobolka
- La qabsan kara caadooyinka jaalliyadda
- Haysta gaadiid heer ku habboon xamili kara
- Dareenka jaalliyadda iyo maalgaliyeyaasha
- La xariirika xaruumaha adeegyada
- Iskutoosin miradhal leh ee si toosa ah loo heli karo

Nuucyada Doorashada

Nuucyada doorashada qiimaynta waxaa ka mida:

- **Baska caadiga ("siday yihiin loo dhaafo")***
- **Baska habaysan (gaadiid iskujir ah)***
- **Basaska casriga ah***
- Baska dheereya (meelaha waqtiiyo go'an gaadid badan)
- Gaadiidka tareenka fudud
- Gaadiidka tareenka xamuulka
- Maglev
- Tareen meel dul sare kormara ama ka soo laallaada
- Gaadid sida basas aad u yar waddada tareenka mara
- Tareenka isku xira maagalada hoose iyo banaanka

**Nuucyada doorosoyinka ee la ogaaday inay yihiin wa sida ugu fiican u qancinaya ujeeddooyinka iyo himilooyinka mashruuca ee lagu taliyay in qiimayn tifatiran lagu sameeyay.*

Doorashooyinka Iskutoosinta

Nuucyada dooroshooyinka iskutoosinta iyo u dhow jidadka Nicollet iyo Central ayaa la eegay (qariiradda eeg). Doorashooyinka iskutoosinta lagu taliyay in qiimayn tifatiran lagu sameeyo waa:

- Guud ahaan jidadka koofurta, Central Avenue NE, Nicollet Mall and Nicollet Avenue S
- Laba doorasho la isaga gudbo wabiga Mississippi River (Jidadka Hennepin/First Avenue iyo Central/Third Avenue S)
- Laba doorasho isku xirayo Lake Street (Marka koobaad/ Blaisdell Avenue iyo jidka Nicollet Avenue S ee loo furay)



Doorashooyinka Qiimaynta Tifattiran

Doorashada baska habaysan, basaska casriga iyo baska caadiga in loo dhaafo ayaa lagu samaynayaa qiimayn tifatiran. Astaamaha muhiimka ee baska habaysan iyo baska casriga waxaa ka mida:

- Adegga joogtada
- Joogsiyo ka yar ku baska xaafadad ka shaqeeya
- Adeeggaa bas dheerada
- Calaamadaha ragitaanka oo la yareeyay
- Basas se degdegsan loo korayo
- Gaadiid ballaarn oo si fudud lagu garan karo
- Jogsiyaa oo meelo waxyaalo badan leh
- Istcimaalaya jidadka ay maaraan baabuurta yar iyo ku weynba

Waxaa la filaya in doorasahada baska casriga in lagu hirgaliyo waqtiyo kala duwan taaso looga cudurdaarayayo dhaqaalaha gacanta lagu hayo iyo laga faaiidaysanayo waxa ka qabsaday magaalooyin kaloo Maraykanka ku yalla. Waxaa kaloo sii dheer in waddada dheer ee 9ka mayl ah, ku dhawaad 3.5 mayl ee laynka baska casriga maro inta u dhaxaysa Lake Street iyo East Hennepin Avenue in la qiimayn doono iyo talo ahaan lagu hagaajinayo baahi ku salaysan natiijooyinka qiimaynta.

Waxa ay Iskumid ka Yihiin Baska Habaysan iyo Baska Casriga

Adeegyada Joogtada: Baska habaysan iyo baska casriga waxa lalgu heli doonaa si joogto ah sida adeegyda baska caadiga ah, lagu helayo inta u dhaxaysa 7.5 illaa 10 daqiiqo.

Ka Joogsiyo Yar Baska Caadiga: Qariiradda dhinaca bidix ku taalla waxay tusaysaa fikradad laga qabo joogsiyda baska habaysan iyo baska casriga ah. Marka la joogsanayo isgoyska labadii jidba halka hal la joogsan lahaa isgoyska halkii jidkba, baska habaysan iyo baska casriga waxay meelaha ku tagaan xawaare ka dheereya kan midka baska caadiga haddana ku gaarsiinaya meesha aad u baahnayd inaad tagto adigoon kordhin lugayskaaga.

Adeegga Bas Is-dhammaystiran: Baska habaysan iyo baska casriga waxay baddali karaan baska caadiga, laakiin baska caadiga ee waddada xiriirka ka shaqeeya ee waqooyiga ka xiga Xarunta Columbia Heights Transit Center iyo koofurta ka xiga jidka 46th Street waxay ka sii shaqayn doona magaalada hoose ayaga oo isticmaalayo adeegga joogsi xadidan. Ma jiraan wax isbaddallo ah meelaha ay maraan lamabarrada 11, 17 iyo 25.

Sugitaanka Nalka Joogsiyada ee La Dhimay: Sancada sugitaanta nalalka joogsiyada waxay fursad u siinayaan inay baska habaysan uu si degdegsan uga gudbo joogsiyada waddada xiriirka ku yaalla.

http://www.minneapolismn.gov/nicollet-central

Raacitaan Degdegsan: Marka aad baska ama baska habaysan aad raacayso adiga oo tigidhka gacanta lagu raacayo gacanta ku haysta albaabka aad doonaysana ka gala baska habaysan iyo baska casriga waxay ku siinayaan adeegyo ka degdegsan kuwa baska caadiga ah waqtigaan la raaco.

Everett, WA

Gaadiid Ballaaran, Si Fudud Lagu Aqoonsan Karo: Nuuca gaadiidka baska habaysan iyo baska casriga waxay qaadan rakaab ka badan midka uu qaado baska caadiga ee dhererkiisu yahay 40 cagood:

- Baska caadiga: 40 illaa 50
- Baska habaysan (60-cagood u farsamaysan): 70 illaa 90
- Bska casriga (67-cagood): 100 illaa 120

Nuuca gadiidka baska caadiga iyo baska casriga waxay kaloo yeelan doonaan baadisoocid si aad ku ogaatid inay ka duwanyihiin baska caadiga.

Cleveland

Joogsiy Adeegyo Badan ee Kala Duwan: Joogsiyda baska habaysan iyo baska casriga caadiga ahaan waxay leeyihiin meelo ka adeegyo badan kuwa laga helo joogsiyada baska caadiga, halka laga koray dhulka aad ugu dhow iyo xogta joogtada ee sheegaysa waqtiga uu gaadiidka lamidka ah uu joogsiga imaanayo.

Kansas City

Seattle

Isla Waddada ay Isticmaalaan Baabuurta Yaryar iyo Kuwa Waawayn ayay Maran: Baska habaysan iyo baska casriga waxay ka shaqayn doonaan waddooyinka ay baabuuta yaryar iyo kuwa waawayn isticmaalaan ee waddada iskuxirta Nicollet-Central mara.

Portland

http://www.minneapolismn.gov/nicollet-central

Siday ku kala Duwanyihiin Baska Habaysan iyo Baska Casriga?

Iyaga oo meelo badan ay iksu mid ka yihiin, baska habaysan iyo baska casriga meelo muhiim ayay ku kala duwanyihiin, gaar ahaan:

Dhismaha

- **Baska casriga waxa u marada waddaa tareenka.** Waddada oo biro lagu goglayo taaso sababaysa in waddada dhinaca inta la jajabiyo biraha lagu goglgo, aan waddada oo idil ahayn.
- **Baska casriga waxa uu isticmaala tamarka korontada.** Waxa uu dusha sare ku leeyahay wayarro koronto qaada ee ku xiran tiirarka nanalka waddada dhinaceeda ama tiirar qaasa oo qiyaastii oo isujira 80 cagood iyo istaashin yar halkii mayl iyo bar ee ballacooda uu yahay qiyaasti 15 illaa 20 cagood.

Portland

- Baska casriga waxuu u baahanyahay **garaashyo u gaar ah ee lagu toostoosiyo laguna hayo** ee u dhow halka ay maraan. Goob ah laba illaa saddex dhul cabbiired (halkii dhul cabbireer: 4,840 yaardi oo jibbaaran ama 4,447 miitir ee jibbaaran) oo garaash u noqon karta 10 illaa 15 gaadiidka basaska casriga.

Rugta Garaashka Seattle

http://www.minneapolismn.gov/nicollet-central

Kharashka

Baska casriga hayntiisa iyo hawlglalintuusi waa uu ka kharash badanyahay baska habaysan, balse waa uu ka jabanyahay kan tareenka fudud.

Dabacsanaanta Safarrada

Bacdama taayaradda ay bambiiro ka samaysanyihiin, baska habaysan si fudud ayuu uga leexan kara waxa xayiraya, loo baddali inuu waddo kale maro, halka baska casriga uu marayo waddada tareenka uu maro oo kale oo waddo kale loo baddali karin.

Everett, WA (sawirka: Dan Honan)

Nacfiga Horumarinta Dhaqaalaha

Baska casriga waxaa caadi ahaan lala barbardhigaa natijooyin ah inay dhici doonaan horumarin dhaaqalaha laga filayo marka baska caadiga la barbardhigo. Meelaha loogu talagalay inuu joogsado ay soo jidaan karaan ganacsi iyo horumar.

Seattle (sawirka: Reconnect America)

Siday ku kala Duwanyihiin Baska Casriga iyo Tareenka Fudud?

Waddada u qaado tareenka fudud waxay ka hirgaleen Twin Cities 2004tii waddada labaadna waxaa la filaya in 2014 laga hirgaliyo. Baska casriga deegaankan waa uu ku cusubyahay. Maxay labadooda ku kala duwanyihiin?

Laymanka Waddada/Waddada Tareenka

- Baska Casriga: Isticmaala isla waddada baabuurta yaryar iyo kuwa waawaynba
- Tareenka Fudud: Isticmaala waddo ka dwuan baabuurta yar iyo kuwa waawaynba

Dherarka Tareenka

- Baska Casriga: Lamid ka tareenka; Portland waay isticmaaha mid uu dherarkiisu yahay 70 cagood kiiba
- Tareenka Fudud: Dharererka tareenka waxuu la egyahay inta u dhaxaysa laba illaa saddex baabuur; halka saddexda baaabuur uu dherkooda noqonayo 90 cagood

Fogaanshaha u dhaxasya Joogsiyada Gaadiidka

- Baska Casriga: Waxuu joogsanayaa isgoyska labadii waddaba
- Tareenka Fudud: Waxuu joogsanayaa isgoyska affartiid jidba ama illaa halkii maylba

Dherarka/Nuuca ee Safarrada ay Galaan

- Baska Casriga: Gaaban (caadii ahaan wax 4 mayl la eg ama ka yar); ka shaqeeya magaalada hoose iyo xaruumaha u dhow
- Tareenka Fudud: Dheer (caadii ahaan wax 8 mayl ama ka yar); ka shaqeeya meelo fog, magaalooyin kale

Isku Celceliska Kharashka Dhisidda (halkii maylba)

- Baska Casriga: $30 illaa $60 malyan
- Tareenka Fudud: $80 illaa $125 malyan

Saamaynnada Dhismaha

- Baska Casriga: Sidaa u ballaarnayn
- Tareenka Fudud: Aad u ballaaran

Nidaamyada Sambalka (Shaqeeya/Dhismo ku Socota)

- Baska Casriga: Portland, Seattle, Tacoma; Tucson, Salt Lake
- Tareenka Fudud: Minneapolis-St. Paul, San Francisco, Portland, Seattle, Charlotte, Salt Lake, Buffalo

Tareenka Fudud ee Saint Paul

Baska Casriga ee Portland



Tallaabooyinka Xiga

Inta lagu jiro qaybta xigta ee darasaadka, Qiimaynta Doorashada Tifatiran (Detailed Evaluation of Alternatives), macluumaadka soo socda waxuu loo diyaarin doona bska habaysan, baska casriga iyo baksa caadiga ee jira, iyo fikradda bilowga ee doorashada baska habaysa.:

- Kharashka dhisidda
- Tirada dadka raacaya
- Saamaynta bay'adda
- Saamaynta socodka gaadiidka
- Kharashka isticmaalka iyo haynta (kharasha sanadlaha ee soo noqnoqonaya)
- Saamaynta kharashka (kharasha guud ahaaneed ee raakaabka raaca loo qaybinayo)
- Fursadda lagu helayo in lagu so jiidanyo guryo iyo shirkado/shaqooyin waddada Corridor
- Dareenka dadwaynaha iyo maalgaliyeyaasha

Macluumaadkaan waxay kaa caawin doonaan sidii lagu gaari lahaa doorashaa ugu fiican ee qancinaysa mashruuca ujeeddadiisa iyo himilooyinkiisa iyo lagu qaadanayho Locally Preferred Alternative (Doorashada Lagu Wada Heeshiiyay) ee gaadiidka waddada mara. Qariiradda hoose waxay na tusaysaa nidaamka darasaadka hadda socda iyo waqtiyada la filayo inay hawlgalaan, iyo ay la socdaan hawlaha kale ee loo baahanyahay in qorshaha lagu sii hormarinayo.



Daraasaddaan waxaa hoggaaminaysa Magaalada Minneapolis oo kaashanaysa Metropolitan Council iyo Metro Transit..

http://www.minneapolismn.gov/nicollet-central